

Xiriirka Ka Dib Kulanka IEP

Waalidiinta oo lala xiriirka ka dib kulanka IEP waxa ay caawisaa habsami u dhaqan gelinta IEPga ilmaha. Halkan waxaa la idinkugu soo gudbinayaa dhawr talo soo jeedin:

- La soco horumarka ilmahaagu ku talaabsanayaan. La soco inta jeer ee warbixinta la qoro iyo xiriirka aad la leedahay dugsiga laakiin xusuusnow in aad la xiriiri karto dugsiga oo aad codsan karto warbixinta xaaladda ilmaha markii aad doonto.
- Waxa aad codsan kartaa in la qabto kulan haddii aadan ku qanacsaneyn horumarka ilmuhu ku talaabsanayo ama aad aamisan tahay in ay jiraan dhibaatooyin saamayn ku yeelanaya horumarka ilmaha.
- Kulanka dib u eegista ee ugu yaraan hal mar la qabto sanadkii waa mid kooxda kula socoto halka wax marayaan.
- Dib u eeg xaaladda ilmaha ka hor inta aan la gaarin marxaladda kala guurka (sida dugsiga hoose loona gudbayo kan dhexe). Isku day in aad ogaato waxyaabaha hagaagay iyo talaabada xigta ee IEP.
- Waa in aad uga mahad celisaa shaqaalaha dugsiga dadaalka ay la yimaadeen La socodsii waxyaabaha aad u wanaagsan ee lagaaray! Sidoo kale gaarsii horjoogahooda.



Remember IDEA 2004 requires that the IEP describe when periodic reports to the parents on the progress the student is making toward meeting the ujeedooyinka sanadlaha ah.

La soco horumarka ilmahaagu ku talaabsanayaan.




Ka dib marka la qoro IEP oo ay bilaabato dhaqan gelinta IEP, waxaa loo baahan yahay in lala socdo baahida IEP. La socoshadu waa mid ka caawiya waalidiinta, dhakhaatiirta, macalimiinta iyo inta kale ee ka qeyb qaadanaysa qiimeyn joogta ah ku sameeyaan sida barnaamijka ardaygu u shaqeynayo. La socoshadu waa mid aad muhim u ah waayo waligaa ma ogaan kartid haddii barnaamijka ama ujeedooyinka yihiin kuwo u shaqeynaya ilmaha. Haddii aad dhibaatooyinka ogaato xilli hore, waxaa tahay qofka ugu haboon oo xalin kara dhibaataada isaga oo kaashanaya kooxda si wax looga bedelo baahida barnaamijka.

Waalidka, waa u madax banaan tahay in aad go'aan ka gaarto haddii aad jeclaan laheyd in lagu soo diro warbixinta ku saabsan horumarka iyo koritaanka ilmaha marar fara badan.

Hababka Loola Socdo Horumarka Ilmaha Ee Barnaamijka:

- Qiimee warbixinta horumarka. Warbixinta horumarka waxaa loo adeegsadaa in lagu diiwan geliyo horumarka ilmuhu ka smeynayo meel gaar ah.



- Isticmaal qoraalka fariinta maalinlaha ama todobaadlaha ah ee caruurtaada. Fariinta guriga waxaa noqon kara fariin guriga loogu soo diro si joogta ah iyada oo lagu qoro buuga ardayga, ama waxa ay noqon kartaa liis la is weydaarsado.
- Ku keydi “galka guriga” hawsha ilmahaagu qabto, fariimaha macalimiinta iyo waxyaabaha kale ee la is weydaarsado, nuqulka IEP, nuqul ka mid ah natiijada qiimeynta, iwm.
- Si taxane ah u keydi horumarka ilmahaagu sameynayo iyo waxyaabaha ku adag ee aad u fiirsatay marka uu joogo guriga.
- U fiirso waxyaabaha uu guriga la yimaado ilmahaaga. Haddii aanu hawsha si wanaagsan u qaban si joogta ah, u dhameystirin ama jawaabaha uu qaldo ay aad u badan yihiin, waxa ay taasi calaamad u tahay dhibaato jirta. Haddii aanay marna soo adkaaneyn ilmaha shaqada loo diro, taasi waxaay calaamad u tahay dhibaato jirta. Sidoo kale, u fiirsdoo haddii uu dhib kala kulmo shaqada loo diro ama aanay dhib u ku aheyn ilmahaaga.
- Mar kasta qiimeynta naftaada ku kalsoonoow. Haddii ilmahaaga aanu faraxsaneyn ama aad “dareemeyso” in wax ka qaldan yihiin, waxa laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad macalinkiisa la kulanto.
- Kutumia barua pepe ni njia faavu sana ya kuwafahamisha wanachama wote wa timu ya IPE kwa wakati mmoja kuhusu mahitaji ya mwanafunzi. Inakupa njia faavu ya kujifahamisha wakati wote kuhusu maendeleo ya mtoto wako huku ukiendela kuweka rekodi ya maingiliano yako na wanachama wa timu ya IEP.

Maudhui haya yametolewa katika kitabu cha Utah Parent Center handbook:

Kijitabu cha Parents as Partners in the IEP Process Parent Handbook



Utah Parent Center